# Saamiga Kuraaseed ee La Siiyo Dumarka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahey Ma Waafaqsan Tahey Dastuurka?

*Mabda'a Sinaanta Muwaadiniintu Ma Si Isku Mid ah in Loola Dhaqmo Dadka Xaaladoodu kalaGadisan Tahey Baa Macnaha Mabda'u, Mise Tafsiirka Mabda' Sinaanta ayaynaan Fahmin**?***

***Qore: Garyaqaan: Hassan Farah Mohomed 09 Oktoobar 2012***

Sida la ogyahay waxa Golayaasha Sharci Dejinta waxa horyaaley dhawaanahan Xeer lagu magac darey "***Xeerka Saamiga Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahey ay ku Leeyihihiin Golayaasha Qaranka***" xeerkan oo sameyntiisa ay ka danbeysay Guddu uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Soomaaliland u saarey hawsha saamiga ee dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa la heyb soocaa ku leeyihiin golayaasha sharci-dejinta, guddidan oo uu saarey Madaxweynaha Jamhuuriyada Soomaaliland si ay daraasad ugu soo sameeyaan talo-bixinta ka dhalata daraasada ay sameeyaana ugu soo gudbiyaan Madaxweynaha JSL. Guddidii hawsha loo saarey waxa ay soo saareen tallo-bixin ay ugu magac-dareen "*Soo Gudbin Talo Bixinta Guddida Deraaseynta Xoojinta Kaalinta Haweenka iyo Dadka Laga Tiro Badan Yahay ee Ka-qayb galka Siyaasada****".***

Madaxweynaha JSL ka dib markii uu halay tallo-bixinta kor ku xusan, waxa uu si taxadar leh oo ay ka muuqato iska dheeraynayo wixii ka yimaada isla markaana guddida hawshoodii aan meel kaga dhicin waxa uu qoraal si taxadar leh uu u gudbiyey Golaha Wakiilada qoraalkaasi oo sumadiisu tahay *JSL/M/SHGW/081-944/022012* kuna taariikheysan 08/03/12, taas oo nuxurkeedu ahaa in Golaha Wakiiladu waafajino shuruucda dalka kana gudano waajibaadka Dastuuriga ah ee Golaha waqtiga ku haboon. Talada Guddidu waxa ay ku soo biyo shubatey in haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey looga qoondeeyo saami cayiman kuraasta Golayaasha Deegaanka iyo kuwa Golaha Wakiilada iyo Guurtida. Waxan halkan si kooban aan jeclahay in aan u soo koobo Qodobada sharci ee arintani saameynaya, waxan jeclahay in aan bayaamin ku sameeyo sharciyada arintani, maadaama oo dad badani isweydiinayeen kana shaki qabaan in arintani sharciga waafaqsan tahey iyo in kale.

## 1. Hordhac

Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland ayaa ugu sareeya xeerasha dalka, xeer kasta oon Dastuurka waafaqsanayna waxa u noqonayaa waxba kama jiraan.[1] Dastuurku waxa uu muwaadiniinta Jamhuuriyada siinayaa xuquuqo siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo doorasho si waafsan Dastuurka iyo xeerasha dalka, waxanu muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo siinayaa xaqa ah in la doorto waxna uu doorto.[2] Dastuurku waxa uu sidoo kale, waajibinayaa in muwaadiniinta Soomaaliland iyada oon lagu kala saareyn midabka, qabiilka, dhalashada, luqada, lab iyo dhedig, hanti, mudnaan, afkaar iwm, in ay sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman. Misna sidoo kale waxa uu waajibinayaa in kala sareynta ku salaysan isirka, abtirsiga, dhalashada iyo deegaanku ay reebanyihiin, isla markaana barnaamijyo lagu cidhib tirayo dhaqanadaasi ay yihiin waajib qaran.[3] Waxa intaasi dheer, Dastuurku waxa uu waajibinayaa in qodobada la xidhiidha xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah loo fasiri doono si waafaqsan bayaanada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee ku xusan Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.[4]

1. Su'aasha sharci ee isweydiinta mudani waxa ay tahey:

2. Mabda'a sinaanta muwaadiniintu, ma ka soo horjeedaa mise wuu waafaqsantahay saami gaar ah oo loo qoondeeyo haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey?

3. Dastuurkuse muxuu ka qabaa arinta saami loo qoondeeyo haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey?

## 2. Fasiraada Sharci ee Qodobada Dastuurka

Mabda'a xuquuqda sinaanta muwaadiniinta macnaheedu maaha in si isku mid ah loola dhaqmo muwaadiniinta xaalad kasta, nuxurka macnaha ku jiraa waxa uu yahay "*Qaab isku mid ah oo loola dhaqmo laba qof oon isku mid ahayn ama si kale aan u dhigee aan isku xaalad ahayn, ayaa meel ka dhac ku ah mabda'a sinaanta muwaadiniinta*". Sidoo kale, mabda'a sinaanta muwaadiniintu waxa uu ku waajibinaya dawlada in ay qaado barnaamijyo lagu cidhib tirayo dhaqanada takoorta iyo duudsiga ku salaysan. Hadaba hadii xaaladaha gaarka ah ee qayb gooni ah oo bulshada ka mid ahi ay ka hor istaagto in ay helaan xuquuqdoodii Dastuuriga ahayd, waa in ay dawaladu qaadaa talaabo gaar ah oo ay ku saxaso arintaasi. Talaabada noocan oo kale ahi waxa ay ku noqon kartaa in muddo la siiyo kooxdaasi bulshada ka midka ah xuquuqo siyaaso ah oo khuseeya arimo cayiman oo ay lagaga sad bursaday marka la barbar dhigo bulshada inteeda kale. Talaabada noocan oo kale ah waxa la qaadaa xaaladaha ay jirto kala duwanaansho dhab ah oo muuqdaa.

Xaqa sinaanta muwaadiniintu ay ku leeyihiin sharciga hortiisu kama dhigaso hadii si kala duwan loola dhaqmo qaybaha bulshada xaaladaha qaarkood mid takoor ah. Kala duwida ku salaysan qiimeyn maangal ah oo sugani kama dhigna takoorkii mabnuuca ahaa (la diidanaa).

Helitaanka xaqa sinaanta muwaadiniinta ee uu Dastuurku siiyay ayaa lagu xadgudbay marka iyada oo aysan jirin cudur daar sugan oo maagal ahi lagu guul dareysto in loola macaamilo si kala duwan shakhsiyaadka ay xaaladooda guudi aad u kala duwan tahay. Tusaale ahaan: qofka qaangaadhka ah iyo kana an qaanqadhin si isku mid ah loola dhaqmi maayo, hadii ay danbi wada galaan, sidoo kalana qofka baahi bakeylo qaleen ahi heysaa hadii uu wax xado loola dhaqmi maayo is la mid ah tuuga caadeystaha ah "*habitual offender*" ama gasariirka ah "*hard-core*". Sidoo kalana si isku mid ah loola dhaqmi maayo marka laga hadlayo cashuuraha qof ganacsade ah iyo qof aan camalba heyn. Dhamaan dadkan aan halka sare ku soo xusney waa qeybo bulshada ka mid ah oo xaaladooda gaar ahaaneed awgeed ayna suurto-gal ahayn in lala simo muwaadiniinta kale ee dalka iyada oo la adeegsanayo mabda'a sinaanta muwaadiniinta ee Dastuuriga ah.

Sida aynu ognahay, Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay labaduba, kama helin saamigii ay ahayd in ay ka helaan golayaasha qaranka doorashooyinkii dawladaha hoose iyo Wakiilada, taasi oo ay keentay dhaqanka oo labadan kooxoodba si gaar ah uga hiiliyay una saamixi waayey in ay sadkooda ku helaan tartanka furan ee muwaadiniinta, umana suurto gelin in ay si siman ula loolamaan muwaadiniina kale ee dhigooda ah oo cod ku soo baxaan. Mar hadii aynu isku waafaqsanahey, in xaalada gaarka ah ee

haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey ay ka duwan tahay bulshada inteeda kale marka laga hadlayo ka qayb-galka siyaasada dalka waxaa lagama lagama maarmaan ah in si ka duwan loola dhaqmo muwaadiniinta kale, iyada oo la siinayo siyaado ama sed suurto gal ka dhiga in ay kaalintooda cid matasha ka helaan golayaasha qaranka.

Aragtidani sharci waxa sal looga dhigay Qod. 21 Farqadiisa 2aad ee Dastuurka JSL, oo u dhigan sidan "Qodobada la xidhiidha xuquuqda iyo xoriyaadka aasaasiga ah waxa loo fasirayaa si waafaqsan bayaanada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha xeerarka caalamiga ah ee Dastuurkan ku xusan".[5] Bayaanada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha xeerarka caalamiga ah ee dastuurka ku xusan waxa iyana dhigaya Qod. 10aad farqadiisa 2aad oo u dhigan sidan "Jamhuuriyada Soomaaliland waxa ay aqoonsan tahey, kuna dhaqmasaa Axdiyada Qaramada Midowbey iyo Qaanuunka Dawliga ah, waxa kale oo ay xurmeynasaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha (*Universal Declaration of Human Rights*).[6] Tafsiirka la siiyo mabda' sinaanta muwaadiniinta ama bani'aadamku waa mid ka mid ah mabaa'diida guunka ah ee umadaha aduunku si isku mid ah waqtiyo kala duduwan ay si isku mid ah u tixgashaan. Tafsiirka aynu qodobkani siineyna waa mid la jaanqaadaya tafsiiradaa kala duduwan.

## 3. Sharcigu Muxuu ka Qabaa Saami laga Siiyo Haweenka Golaha Guurtida?

Golaha Guurtidu waa Golaha labaad ee sharci dajinta, tilmaanta Goluhu waxa ay ku cadahay Qodobka 57aad ee Dastuurka JSL, una dhigan sidan soo socota:

> "Golaha Guurtidu Jamhuuriyada Soomaaliland, oo ah Golaha Odoyaasha, waa qaybta labaad ee sharci dejinta waxana ay dib u eegaan xeerarka ka soo baxa Golaha Wakiilada intaan madaxwynaha loo gudbin; wuxuuna dejinta xeerarka ku saabsan Diinta, dhaqanka iyo Nabadgelyada".

Sida qeexitaanka Dastuurka ku cad Golaha Guurtidu waa "Golaha Odoyada" Qodobkani waxa uu qaadanayaa tafsiiro kala duduwan hadii aynu raacno qawaaciida lagu fasiro dastuurada aduunka. Hadii aynu raacno qaaciidada lagu fasiro dastuurada ee "*Originalism*" ama "*Intent of the Drafter*" iyo "*Plain Meaning of the Text*" oo macnahoodu kala yahay tan hore waxa aynu u fasiranaa sida ay ula jeedeen sharci-dejiyuhu markii uu qodobkani qorayey, halka kan labaadna ka yahey fasiraad ku saleysan "*Nuxurka sida ay Kalmadu ugu jirto*" labdaa kafadood hadaan saarno waxa aynu ku qanci karnaa in kalmada "Golaha Odoyada" loola jeedo oday dhaqmeedka maadaama sida ay ku soo bilaab matey ay sal ku heysay xeer-dhaqameedka. Waxa fasiraadan sii badhi taaraya marka aynu ognahey in oday dhaqameedka iyo garaha dhaqanku rag uun loo ogol yahay waliba waayeel ama oday uuni galo balse dumarku xitaa hadii ay dhibane ka tahay xaajada rag u hadlaan ee aaney iyadanu shakhsi ahaan arintaasi faraha la galin. qeexitaankani waxa ay meesha ka saarasaa haweenka oon ku jirin dhaqan ahaan "Odayada" reeraha u gar naqa. Sidoo kale waxa taasi sii adkeynasa, Qodobka 59aad ee Dastuurka farqadiisa 2aad oo ka hadlasa shuruudaha qofka isku soo taagaya xubinimada Golaha Guurtida una dhigan "in uu yahay qof Diinta aqoon u leh, ama oday dhaqan yaqaan ah". Labadaasi qodoba waxa ay si aan mugdi ku jirin meesha uga saareen in haweenku wax door ah ku yeeshaan Golaha Guurtida, saami kasta oo xeer jideeyo oo loo qoondeeyo haweenkuna waa wax ba kama jiraan Dastuuriyan, waana ku xad gudub Dastuur oo mudan culayskiisa iyo saamayntiisa sharci.

## 4. Gaba-Gebo

Mabda'a sinaanta iyo takoor la'aantu macnahoodu maaha in kala duwitaanka si kala duwan loola dhaqmo qaybaha bulshada ee ay xaaladoodu kala duwan tahay ay mabnuuc tahay sharciyan. Kala duwidu waa mid xaq ah oo shariga waafaqsan iyada oo ay shardi u tahay:

- In ay hormuud u yihiin ujeedo sharci ah sida fal cad oo wax lagaga qabanayo sinaan la'aanta waaqaca ka jirta;
- In ay yihiin kuwa macquula oo ku salaysan ujeedo xaq ah.

Marka laga hadlayo saami ay haweenku ku yeeshaan Golaha Guurtidu waa mid baal marsan Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, oo noqonasa xaaraan maadaama aanu Dastuurku si cad u qeexay in Golaha Guurtidu yahay Golaha Odayada isla markaana yahay gole dhaqan, asbaabta aynu ku sababeynay saamiga haweenka ee Golayaasha Deegaanka iyo Wakiiladu noqon mayso mid inagu filan in aynu u adeegsano Golaha Guurtida.

***WABILAAHI TAWFIIQ;***

***Garyaqaan: Hassan Farah Mohamed***
***E-mail: hassan@watershedlegal.com. (Website: www.watershedlegal.com)***

[1] Qod. 128 (1,2) (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).
[2] Qod. 22, (1, 2), (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).
[3] Qod. 8 (1,2) (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).
[4] Qod. 21 (2) (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).
[5] Qod. 21 (2) (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).
[6] Qod. 10 (2) (Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland, 2000).